



JAMHUURIYADA
XAFIISKA XEER ILAALINTA GEBOLKA M/JEEX

XIG/H/657/2019

06/06/2019

Ku:- Maxkamada Gobolka M/Jeex = Hargeysa =

Xeer Ilaaliyuhu markuu darsay gal dacwadeedka ku eedaysan yahiin :-

1. C/malik Sh.Muuse Coldoon Ina Faadumo Rooble.....L/39Jir ah.

La xidhay:- 18/04/2019

Ujeeddo:-Xaashida Eeda si Waafaqsan Qod.70, 71, 75(XHC)

EEDA KOWAAD: Waxaa lagugu eedeynayaa faldambiyeedka ah ceebayn ee ku xusan Qod.452(3)XCG sababtoo ah markay tr.ahayd JAN/2019 waxaad ceebaysay dugsiga abaarso, ardeydiisa iyo macalimiintiisa adigoo yidhi dugsigaasi waxaa lagu bartaa isku galmoodka dadka isku jinsiga ah. iyo in ardeyda labaro diin aan ahayn diinta islaamka.dhaman waxyaabahasi oo ayna waxba ka jirin balse aad uga danlahayd uun in aad ku ceebayso sharafta iyo karamada schoolkasi,ardeydiisa iyo macalimiintiisaba.sidaasina waxaad ugu gaftay qodobkaasi sharci ee lagugusoo eedeeyey.

EEDA LABAAD: waxaa lagugu eedeynayaa faldambiyeedka ah dacaayada ka dhan ah qaranka jsl ee ku xusan Qod.215(1)(G)XCG.sababtoo ah markay tr.ahayd Feb/07/2019 waxaad faafisay dacayado aan sal iyo raad toona lahayn oo ka dhana qaranka jsl. adigoo yidhi "Taliskani tubtii buu hayaa talisyadii hoogay"sidoo kale waxaad faafisay qoraal probagando ah oo aad ku leedaha "Taliska Muuse Bixi Waa Taliskii Cabdi Iley oo soo Koraya".taasi oo aad uga dan lahayd in aad ku probagandeyso qaranka jamhuuriyada soomaliland.sidaasina waxaad ugu gaftay qodobkaasi sharci ee lagugu soo eedeeyey.

EEDA SADEXAAD: waxaa lagugu eedeynayaa faldambiyeedka ah faafin warar been abuur ah ee ku xusan Qod.328XCG.sababtoo ah markay tr.ahayd JAN/2019 waxaad faafisay warar been abuura oo aan sal iyo raadtoona lahayn oo ah in schoolka abaarso lagu barto diin aan ahayn diinta islaamka, sidoo kale lagu baro ardeyda isku galmoodka dadka isku jinsiga ah.taasi oo aad uga danlahayd in aad bulshada reer Somaliland ku kiciso kuna khalkhal galiso amniga guud ee qaranka jsl.sidaasina waxaad ugu gaftay qodobkaasi sharci ee lagugu soo eedeeyey.

Sidaasina waxaad ugu gaftay qodobadaasi lagu soo eedeeyey oo lala akhriyo Qodobada.44, 45, 39,61XCG.

Hadaba waxaanu Maxkamada sharafta leh ka codsanaynaa inay noo cayinto, mudaysana dacwadan , soona saarto talaabooyinka kale ee la xidhiidha sida waafaqsan Qod:- 75,79,80 XHC.

Maragyada Daawada

1. Qaranka jsl.....Dhibane
2. Jir Doud SGsaki.....Dhibane.
3. Xamse Faysal Cabdi.....Dhibane.

4. G/dhexe Cabdi Xasan Cisman.....Marag.
5. G/le.Axmed Cawil C/lahi.....Marag.
6. Xi/le.Yuusuf Dayib Xuseen.....Marag.
7. A/le.Nuux Cali Xasan.....Marag.
8. D/le.C/rashiid Maxamuud Xuseen.....Marag.
9. D/le.Maxamuud Cabdi Jaamac.....Marag.
10. Maxamed Caydiid Axmed.....Marag.
11. D/le.Caraxmaan Cawil Xasan.....Marag.
12. D/le.Cali Cabdi Xirsi.....Marag.
13. D/le.C/raxmaan Carab Xuseen.....Marag.

Marag Muujin.

- 1) Muqaaladii iyo qoraaladii uu faafiyey ee deysanuhu.
- 2) Xukunadii Hore ee deysanaha.

(Abdirahmaan Iid Mohamed)
KUX/Xeer Ilaalyaha Guud

